## Jaalliyadda Baagistaan ee deggan Somaliland waxay u muujisay JSL saaxiibtinimo bogaadin mudan Xuskii 18 May 2023

Xus Qarameedka Sannad-guurada 32aad ee ka soo wareegtay dib ula soo noqoshada qaranimada Somaliland 18 May 1991, oo sidii ugu weynayd abid looga dabbaal degay dalka gudihiisa iyo dibedaba, waxaa ka qaybqaatay shucuub badan, oo ka mid ah saaxiibadda caalamiga ah ee JSL, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen xubno masuuliyiin ahi munaasibadaha ka dhacay didedda intooda badan. Gaar ahaan, xubnaha jaalliyadaha iyo dalxiisayaasha ku sugan dalka ee kala qaybgalay bulshada Somaliland maritaankii fagaaraha dabbaal degga qaranka ee 18 May 2023, ayaa ka soo kala jeeday ku dhawaad labaatan dal ay ka mid yihiin: *Pakistan, Yemen, Syria, America, UK, Ireland, Holland, Norway, Germany, France, Italy, Belgium, Austria, Portugal, Lithuania, Australia, New Zealand iyo Russia.* Kuma jiraan halkan wufuuddii ka socotay dawladaha, ururada caalamiga ah, warbaahinta gobolka iyo ta caalamiga ah iyo martidii kale ee dibedda laga soo casuumay, diblomaasiyiinta dalalka u jooga Somaliland iyo wakiillada hay'adaha caalamiga ah ee ka hawlgala Somaliland, kuwaasoo iyaga laftoodu aan yarayn sannadkan 2023.

Hase ahaatee, waxaan kaga hadlaynaa qormadan kooban jaalliyadda Baagistaan ee deggan Somaliland iyo wacdarihii ay ka dhigeen fagaaraha dabbaal degga qaranka, kaasoo si weyn usoo jiitay indhaha shacabka Somaliland iyo caalamkaba. Jaalliyaddan, oo aan kaliya kaga soo qaybgelin maritaanka tiradii ugu badnayd ee ajaanibkii marayay xuska balse u abaabullaa, oo isugu soo diyaariyay munaasibadda si aad iyo aad u heer sarraysa, sitay boodhadh iyo calamada Somaliland iyo *Pakistan* oo aad u waaweyn, kuna dhawaaqayay erayo Afsoomaali iyo Urduba ay ku taageerayeenn qaranimada iyo nabadgelyada Somaliland. Jaalliyaddan, oo uu horkacayay Guddoomiyahooda, **Dr. Anmol Asghar,** ayaa boodhka ay siteen ku soo xardhay farriinta ay uga gudbinayaan Somaliland caalamka, taasoo u dhignayd: **"*Ku soo dhawoow Somaliland, Somaliland waa nabad, Welcome to Somaliland, Somaliland is safe*"**

Waxaa intaas u dheeraa, Jaalliyadda Baagistaan oo sannadkii ula damaashadayay Somaliland Xuska 18 May, inay iskood isu xilqaameen inay si dhab ah ula qaybsadaan shacabka Somaliland farxadda dabbaal degga Xuska Maalinta Qaran ee 18 May, iyagoo ku tabaracay qurxinta goolada Xarunta Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Wacyigelinta, isla markaana doonayay inay ku maraan dabbaal degga 18 May 200 xubnood isku soo wada baxay balse aanay u wada suuroobin arrimo farsamo ka jiray xagga wakhtiga iyo dhaqdhaqaaqa awgood. Inkasta oo ay jireen jaalliyado kale sida Yemen, oo aad u jeclaa inay si weyn isugu muujiyaan xus-qarameedkan, sida runta ahna ay xubno badan, oo ka mid ahi usoo kallaheen dabbaal degga, balse aanay iyaga wax isugu hagaagin sidii ay saaxibadeenna Baagistaaniyiintu yeeleen, waxaa haddana xusid mudan inay muwaadiniinta u dhashay Baagistaan u hureen wakhti, tacab iyo tamar ba inay si mug leh ula dabbaal degaan bulshada JSL. Sida runta ah, arrintani waa mid noqonaysa taariikh aanay shacab iyo dawlad ba, reer Somaliland illaabi doonin, isla markaana fure u noqon karta xoojinta xidhiidhka saaxiibtinimo ee labada wadan, Somaliland iyo *Pakistan* tusaale dhinacyada ganacsiga, maalgashiga, dhaqanka, dalxiiska, isucocodka guud iyo danaha kale ee la wadaagi karo ama la iska kaashan karo si labada shacabba faa'iido u leh.

Waxaan u mahad celinayaa dhammaan xubnaha jaalliyadda Baagistaan, Guddidooda iyo gaar ahaan Guddoomiyaha Jaalliyaddaas, **Dr. Anmol Asghar**, oo runtii aan uga mahad celinayo, kuna bogaadinayo dareenka walaaltinimo, aragtida tolmoon, wada-shaqaynta uu la leeyahay qaybaha bulshada muwaadiniinta ah, hoggaamintiisa togan ee jaalliyadda iyo danayntiisa in la xoojiyo xidhiidhka iyo iskaashiga labada dawladood iyo shacab ee Somaliland iyo *Pakistan*.

Guddoomiyaha Jaalliyadda Baagistaan ee deggan Somaliland, Dr. Anmol Asghar, oo xirfaddiisa shaqo tahay dhakhtar ilkaha ah, ku leh magaalada Boorama xarun caafimaadka ilkaha ah (Murtaza Dental Clinic), isla markaana ah Hormuudka Kulliyadda Caafimaadka Ilkaha ee Jaamacadda Adal, Luuqadda Soomaaligana si fiican ugu hadla, ayaa kadib maritaankii dabbaal degga la hadlay warbaahinta, isagoo cabbiraya dareenkiisa, isla markaana si kooban uga warbixinaya jaalliyaddooda iyo hawlaha ay qabtaan, waxaana ka mid ah hadalkiisii, "Marka hore waxaan hambalyaynayaa umadda Somaliland meel walba ay joogaan sannad-guurada 32aad. Laba iyo soddon sano oo horumar, midnimo iyo nabad ah, waxaan arkaynaa horumarkeeda iyo wanaageeda, aad baan u hambalyaynayaa, Waxaan joogaay Somaliland shan iyo toban sano. Waxaan arkay waxyaabo badan, maalintaan imi iyo maanta isku shaqo maaha. Markaa dawladda iyo siday ugu dadaalayso horumarka aad baan ugu faraxsanahay, aad baan ugu qanacsanahay weliba siday u wadaan. Diyaar garawgeeda (18 May), siday umadaha kale oo dhamiba ugu jireen diyaar garawga, annaguna waan diyaar garawbaynay. Dawladda Hoose ee Hargeysana waxaan ka codsannay inay na siiyaan meel aannu qurxinno, magaaladaan dhex deggannahay inaannu wax ku kordhinno waajib weeyaan, iyaguna way oggolaadeen. Sidaad arkaysaan, Goolada sare ee Idaacadda siduu ahaa markii hore iyo saddex cisho oo qudha aan helnay, markaa saddex cisho gudaheed sidaan u dhigi karaynay ama aan u qurxin karaynay Alxamdulilaah waan dadaallay. Taasina maaha wax kale, waxay ahayd inaan muujinno walaaltinimadeenna, dhexgalka iyo inta umad ah ee aan isku xidhannahay, markaa waxaan la qaybsanaynaa dareen bulshada aan jecellahay. Bulshadeenna (Jaalliyadda Baagistan) guud ahaan marka la eego, ganacsatana way jirtaa, dad farsamo-yaqaan ah oo badanina way jiraan, oo Somaliland dhexdeeda marka la eego waxaa jira waxyaabo badan oo fudud xataa laakiin haddana farsamadeedi ka maqan tahay ama ay liidato. Kollay maalinba maalinta ka dambaysa way is bedelaysaa, dadkuna way dadaalayaan, way baranayaan, waxyaabo badan oo waxaa jira ay iyagu ka maarmi karaan inay shaqaale ajaaniba u yeedhaan. Haddana laakiin way jirtaa baahidu. Shaqaale badan (Baagistaan) oo farsamo-yaqaan ahi way jiraan, dhakhaatiir baa jirta, macalimiin baa jirta, ganacsataduna way jirtaa, markaa bulshadu (Jaalliyaddu) way badan tahay. Marka la eego dhismaha qaabkiisa, anigu markaan imi 2008kii iyo maanta, guryaha qurxintooda gudaha (Interior decoration) iyo waxyaabaha cuntada fudud (Fast food), dadku waxay barteen cuntooyin kala duwan. Aqoon ahaanna, macalimiin badan oo Baagistaan ah baa jooga jaamacadaha kala duwan. Gaar ahaan, qaybta caafimaadka, dhakhaatiir badan baa joogta. Markaa kollay qof weliba meeshiisa siduu ugu habboon yahay iyo siduu ugu dadaali karo uun ku xidhan tahay oo wada shaqayn fiican baa ka dhex socota bulshada.Waxaanan rajaynaynaa inaan intaa in ka badan aan kordhin karro, aan shaqayn karro."

Guddoomiyaha Jaalliyadda Baagistan ee deggan Somaliland, ayaa dhinaca kale fursaddan munaasibadda Xuska 18 May 2023, uga faa'iidaystay inuu ka hadlo arrimo muhiim ah dhiirrigelinta soo jiidashada maalgashiga shisheeye, danaha jaalliyaddiisa ee joogitaanka iyo ka ganacsiga Somaliland iyo xoojinta xidhiidhka ganacsi iyo isu socodka labada bulsho ee Somaliland iyo Baagistaan. Waxaanu talooyin iyo farriin ba u diray Xukuumadda JSL.
"Somaliland, wax weliba wuu ka sii fiicnaanayaa maalin ba maalinta ka dambaysa, joogitaankayaga dalkanina wuu ka sii wanaagsanaya. Waxaan u mahad celinayaa dawladda hoose Hargeysa oo noo oggolaatay inaanu diyaarinno Goolada Idaacadda, inaanu metello jaalliyadayada, lana dabbaal degno bulshada. Xubnahan ka socda jaalliyaddu waxay halkan u joogaan inay muujiyaan midnimada iyo kalgacaylka ay u qabaan bulshada Somaliland. Waxaa sidoo kale jira caqabado aan jecelahay inaan ka codsado dawladda inay tixgeliyaan siyaasadda fiisaha iyo fududaynta ganacsiga Somaliland. Waxaa jira ganacsato (Baagistaani) doonaya inay yimaaddaan dalka oo maalgashadan. Laakiin caqabadda u weyn iyo su'aasha koowaad ee ay na waydiiyaan, ayaa ah marka aannu halkan nimaadno (Somaliland) dib uga noqon mayno, markaa ma ku yeelanaynaa dhalasho (Nationality). Waxay doonayaan inay si rasmi ah u joogaan dalka si ay ganacsigooda u sii wataan. Markaa ugama jawaabi karro su'aashaas. Waa Wasiirka Maaliyaddu noo yeedho, kulamo aan yeelanno, oo aan isla eegno sidii aan wax u hagaajin lahayn ee aan maalgashi u keeni lahayn. Waayo, farriinta aannu u dirayno caalamka oo dhan maaha Baagistan oo kaliya, waa in Somaliland tahay dal nabad ah. Waxaannu ku metelaynaa halkan in dalkani yahay soo dhawaynayo maalgashayaasha shisheeye. Laakiin dhanka dawladda (Somaliland), waxaannu uga baahannahay iskaashi, inay na siiyaansiyaado cad, sidii maalgashi cusub loo keeni lahaa dalka."

Dhakhtarka oo sii wata hadalkiisa, ayaa ku dooday in ajaaniibka muddada dheer deggan dalka ee maalgashaday iyo ubadka ugu dhashay ba ay xaq ugu leeyihiin dawladda in loo tixgeliyo deganaansho rasmi ah iyo aqoonsiga muwaadinnimo, waxaana ka mid ahaa hadalladii uu yidhi,
"Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaannu halkan kaga codsanaynaa, waxaa jira dad joogay halkan sida aniga oo kale shaniyo toban sano, waxaa jira dad laga yaabo inay muddo intaas ka dheer joogeen, qaar kale oo laga yaabo inay toban sano joogeen. Meelkasta caalamka, dawladdii dimuqraadi ahi waxay siisaa xuquuq ajaanibka. Dhammaan muwaadiniinta Somaliland, markay u dhoofaan tusaale Yurub ama Eeshiya, waxaa jira sharci siinaya deganaansho rasmi ah. Halkan kuma hello, xaq baanuna u leennahay. Fadlan tixgeliya dadka xaasaska ku leh halkan, ka ganacsanaya ee maalgashaday halkani, dib ugama noqonayaan halkan. Sidaa darteed, waxay u baahan yihiin deganaansho rasmi ah. Carruurta ku dhalatay halkan, xaq bay ugu leeyihiin inay helaan muwaadinnimada. Sidaa darteed, waxaanu ka codsanaynaa Wasaaradaha ay xidhiidho iyo si toos ahba Madaxweynaha, Mudane Muuse Biixi Cabdi, si naxariis leh u tixgeliya xuquuqdayada. Waayo, halkanaanu idin la joognaa farxaddiinna iyo murugadiinnaba. Waxaan xasuustaa Dabkii Waaheen, waxay noo ahayd wakhti murugo leh, maanta oo bulshadu si farxad leh u dabbaal degayaan, annaguna si farxad leh ayaannu uga qayb nahay oo aannu ula dabbaal degaynaa. Waxaannu idinka codsanaynaa inaad noo yeedhaan annaga, Itoobiyaanka, Kiiniyaanka, Ugaandhiiska, Shiinaha, Taywaanka, Turkida,

waxaa jooga bulshooyin tiro badan oo kale halkan. Waxaannu u baahannahay in Wasaaradaha Dawladdu dhammaantayo isu kaaya keenaan, aan wada fadhiisanno, ka wada hadallo sidii aan wax u hagaajin lahayn, sidii aan guusha uga wada shaqayn lahayn. Horumarka wadanka sidaan u keeni lahayn aan ka wada shaqaynno"

"Waxaan rajaynayaa in Ilaahay mar uun suurtagelin doono. Waxaan joogay Somaliland shaniyo toban sano ka mid ah cimrigayga. Carruurtaydu may arag Baagistaan, iyaga halkaana u ah dhulkoodii hooyo, waanay jecelyihiin Somaliland. Laakiin haddana ugu dambayn, waxaanka xumaadaa marka loogu yeedho ajaanib,"

"Tani waa markayagii labaad ee aannu si rasmi ah uga qaybqaadanayno maalinta madaxbanaanida Somaliland laakiin waxaannu ugu dhex dabbaal degaynaa dadka Somaliland dhexdooda si weyn oo farxad leh sannadkan, waxaan u dabbaal degaynaa si cajiib ah, tanina waa tusaale ka dhexeeya labadeenna bulsho. Reer Somaliland waa dad wanaagsan, waxay nagu soo dhaweeyaan dalkooda, raalli bay naga yihiin, waanay xishmeeyaan bulshadeenna. Markaannu aragno soo dhawayntooda, waxay nagu dhiirrigelisaa inaanu ka sii mid ahaanno Somaliland. Markaannu aragno farxadooda, bulshadayaduna way ku faraxsan tahay, waanan u mahad celinaynaa walaalahayaga Somaliland," **Shariif Maxamed Khaan.**

"Waa markaygii koowaad ee aan ka qaybgalo 18 May Somaliland, aad baanan ugu quushacay inaan arko inay dadka reer Somaliland la leeyihiin saaxiibtinimo sidan u wanaagsan iyo xidhiidh sidan u wanaagsan dalkayaga, dadkayaga Baagistaan, waxaanan u jecelahay Baagistaan, sidaan u jecelahay Somaliland," **Jacfar Shaahi.**

"Waxaan doonayaa inaan farriin u gudbiyo caalamka oo dhan. Waxaan doonayaa inaan u sheego caalamka oo dhan inay Somaliland tahay nabad. Taasi sababta aanu ugu noollahay halkan, waa sababta aannu maanta u joogno halkan, waayo, Somaliland waa nabad. Xataa waxaan doonayaan inaan ku idhaaho Dawladayda Baagistaan, Somaliland waa nabad, waxaan doonaynaa inaan joogno dalkan, markaa in Dawladda Baagistaan ogaato , waannu ku nabadqabnaa halkan, waannu madaxbannaanahay, waannu jecellahay Somaliland," **Danyal Asghar**

Nabadgelyada ka jirta Dalka Jamhuuriyadda Somaliland, deganaanshaha siyaasadeed, dimuqraadiyadda iyo nidaamka dawladnimo ee ilaalinaya xuquuqda aadamaha, fursadaha ganacsi ama maalgashi iyo kuwa dalxiis ba ee ka jiraa, waxay dhiirrigelinayaan imaatinka dadka ajaanibka ah ee jinsiyadaha kala duwan leh, oo marba marka ka dambaysa ku soo badanaya Somaliland. Waxaa ka mid ah ajaanibkaas gaar ahaan kuwa deggan Somaliland bulshooyin qaxoontinimo loo aqoonsaday, oo soo magangalay Somaliland kadib colaado ka dhacay ama ka jira dalalkooda sida dadka Yemeniinta ah iyo Suurida, dad xirfadleyaal ah oo ruqsado shaqooyin iyo fiise deganaanshe la siiyay, kuwaasoo u shaqeeya ganacsatada muwaadiniinta ah, shirkadaha, dugsiyada, jaamacadaha iyo xarumo kaleba qaarkood. Waxaa ka mid ah ajaanibkaas xirfadleyaal iyo xubno kaleba, oo maalgashaday dalka, meherado ganacsi iyo hanti kaleba ku leh iyo qaar ku jira waaxda adeeg bixinta (Service sector) sida caafimaadka, waxbarashada iwm. Waxaa iyaguna jira ajaanibka dalxiisayaasha caalamiga ah, oo si joogta ah u yimaadda Somaliland, kuwaasoo

kaalmo, todobaaddo iyo muddooyin kala duwan jooga, booqda Laas Geel iyo goobaha kala duwan la dalxiiso Gobollada iyo Degmooyinka Somaliland. Waxaa ka mid ah bulshooyinka ajaanibka ah ee deggan Dalka Jamhuuriyadda Somaliland, jaalliyadaha dadka Itoobiyaanka ah, **Kiiniyaanka, Ugaandhiiska, Masaarida, Yamanida, Baagistaanida, Suurida, Hindida, Bangaaliga, Taywaaniiskka, Shiinaha, Turkida iyo** yo jinsiyado kaleba. Waxaa ka mid ah jaalliyadahaas xubno muddo labaatan sano ku dhaw deggan Hargeysa iyo magaalooyinka waaweyn ee dalka, oo ka shaqaysta, kuwaasoo qaarkood xaasas iyo carruur ugu dhalatay Somaliland u joogaan, si fiican wax uga yaqaan taariikhda Somaliland iyo qadiyadda madaxbanaaneeda, is-dhexgal fiican la sameeyay bulshada, qaarkoodna haatan si fiican ugu hadlaan Afsoomaaliga sida Guddoomiyaha Jaalliyadda Baagistaaniinta. Ma aan tixraacin tirakoobka saxda ah ee dawladdu ka hayso balse waxaa ka mid ah jaalliyadaha ugu badan Itoobiyaanka iyo Yamanida. Gaar ahaan, Jaalliyadda Baagistan lafteeda oo ka mid ah jaalliyadaha ku soo badanaya Somaliland, ayaa haatan lagu qiyaasaa inay ku dhawaad 1,000 qof ka deggan yihiin Jamhuuriyadda Somaliland.

**Xasan Axmed Yuusuf**
**Tell: 063 4081527, hassanafgaab@gmail.com**
**Hargeysa, Jamhuuriyadda Somaliland**
**May 23rd 2023**